



Xeerarka dugsiga xagaaga furan (Sommaröppet)

Inta lagu jiro todobaadka 28- 31 waxaa la isku darayaa dugsiyada xanaanada caruurta iyo guriga xilliga firaaqada. Dugsiga xanaanada Vänerparken 25 ee ku yaalla bartanka farasmagaalaha ayaa wuxuu bixiyaa daryeelka caruurta, waxaan kaloo caruurta boos ka haysata xaafadda Dalsan lagu casumayaa boos dugsiga xanaanada ee Frändefors todobaadyada 28 -29 iyo dugsiga xanaanada ee Brålanda todobaadyada 30-31. Guriga xilliga firaaqada ee Tärman wuxuu bixiyaa daryeelka caruurta inta lagu jiro todobaadyada 28-31.

Isu diiwaangelinta Sommaröppet

Yaa dalban kara boos hayn?

Mas'uulka caruurta laga bilaabo caruurta hal sanno jirka ee boos ka haysta dugsiga barbaarinta caruurta/hoyta xilliga firaaqada ayaa waxay ka dalban karaan daryeelka caruurta dugsiga xagaaga furan (sommaröppet), ilaa iyo inta loo baahan yahay ayadoo la eegayo shaqada ama waxbarashada waalidka. Haddii aad boos u baahan tahay todobaadyada 28-31 waxaa codsiga dayeelka xilliga xagaaga "Anmälan till sommarbarnomsorg" lagu buuxinayaa dhinaca internetka.

Dalabka

Degmada Vänersborg waxay bixineysaa daryeelka caruurta ee dugsiga xanaanada/hoyga xilliga firaaqada ee xagaaga furan (sommaröppet) ayadoo ay shuruudu tahay in la soo gudbiyo "dalabka codsiga daryeelka caruurta" ugu dambeyn 31 maajo 2024. Codsiga waxaa lagu xusayaa magaca ilmaha, meeleynta caadiga ah, warbixinta waalidka/mas'uulka ilmaha iyo warbixin kale ee muhiim u noqon kara dugsiga xanaanada/xilliga firaaqada. **Si loo qorsheeyo hawlaha waa in aad kusoo gudbisaan aaladda jadwalka ilmaha InfoMentor Hub.**

Wargelinta boos celinta

Marka ilmuhu boos ka helaan dugsiga xanaanada/hoyga xilliga firaaqada ee sommaröppen waxaa loo dirayaa waalidiinta farriinta ogeysiinta meeleynta. Farriinta waxaa ku qoran warbixin ku saabsan hawlaha xilliga xagaaga, qaybta ay ilmuhu boos ka heleen iyo warbixinta cinwaanka xiriirka ee ku saabsan waaxda.

Soo wargeli maamulka degmada ee meelaynta caruurta haddii baahidaada booska aysan weli jirin ama isbedeshay.**Jadwalka**

Xilliga xaadirista ilmaha ee dugsigu xanaanada/hoyga xilliga firaaqada waxaa lagu diiwaangelinayaa ayadoo la isticmaalayo barnaamika InfoMentor Hub.

- Haddii waalidku uu shaqeeyo ama uu wax barto waxaa jadwalka la qorsheynayaa oo la gelinayaa ayadoo laga eegayo xilliga shaqada oo ay ku jirto xilliga nasashada.
- Haddii waalidku ku shaqeeyo si ku meelgaar waqti gaaban ah waxaa ayadana shaqeyneysa isla nadaamka qofka shaqeeya ama wax barta, jadwalka shaqadana waxaa laga eegayaa waqtiga shaqada oo ay ku jirto xilliga nasashada.

Maqnaanshaha iyo fasaxyada

Fasaxa jirrada iyo fasaxyada kale waxaa lagu wargelinayaa ayadoo la isticmaalayo aaladda InfoMentor Hub ama waxaa si toos loola xiriiirayaa dugsigu xanaanada/hoyga xilliga firaaqada ee sommaröppna. Warbixinada cinwaanka dugsigu/hoyga xilliga firaaqada waxay ku qoran tahay warqadda fariinta meelaynta ee lasoo diro marka carruurta boos looga helo dugsigu. Caruurta xaq uma lahan iney joogaan dugsigu furan xilliga xagaaga(sommaröppna) marka mid ka mid ah waalidiintu uu fasax ku jiro ama fasax nooc kale haysto (sida shaqo waqti isbedbedelaya, ciidaha).

Hawlaha saacadaha shaqo aan habboonayn

Mas'uulka caruurta ee haysta daryeelka caruurta saacado shaqo aan habboonayn wuxuu isticmaalayaa isla dalabka elektarooniga ah.

Nala soo xiriir

Maamulaha meelaynta wuxuu fursad u haystaa inuu ka jawaabo su'aalihiina

Saacadaha telefoonka

Isniin – arbac iyo jimce saacadda 10.00 - 12.00

Lambarka telefoonka: 0521-72 14 79

Cinwaanka elektarooniga: barnomsorg@vanersborg.se

Warbixintii ugu dambaysay ee ku saabsanayd xilliga hawlaha xagaaga , waxaad ka heleysaa bogga internetka ee degmada www.vanersborg.se.